

Waxaad u dalbbaan kartaa geed \$25 ah milkiyaddaada ku taal Minneapolis guban

Laga bilaabo Maarj 17, Magaalada Minneapolis ayaa dadka u fidineysa in ka badan 1,000 geed oo dhererkoodu yahay shan-illaa cagood fuudh oo qiimaha midkiiba yahay keliya \$25. Calaamadayso haddaba kaalandarkaaga. Ka dalbbo geedkaaga www.treetrust.org laga bilaabo 8 subaxdii., Maarj 17. Soo qaado Mey 15, 17, 18 ama 19.

Geedaha ayay heli karaan dadka hanti ma-guurtada leh ee reer Minneapolis kana midka yihiin deggeneyaasha, meheradaha iyo ururrada macaash-la'aanta.

Ka dooro noocac iyo weyni kala duwan kuwo leh, kana mid yihiin geedaha midhaha leh. Sida loo kala horreeyo ayaa laguugu adeegayaa – markaa hore u dalbbo si aad u-hesho xulashada ugu wanaagsan. Halkii milkiyadeedba waa hal geed, ugu badnaan shan milkiyadood.

Geedaha caafimaadka qaba ayaa quruxin doona xaafaddaada, oo kordhin doona qiimaha milkiyadda, gacanna ka geysta nadiifinta hawada aad neefsato, waxayna nuugaan kaarbon-oksaydhka, waxay kuu dhaqaalayn doonaan biilasha tamarta markaad si xeelad leh ugu beerto, magaaladana xagaaga wey qaboojiyaan, waxayna u noqdaan hoy duurta iyo iyaga oo wax ka tara habaynta daadka roobabowga.